Skolverket




Somaliska

# Sii ilmahaaga billow wanaagsan - xooji luqadda!

Macluumaad ku saabsan horumarka luqadda carruurta taas oo loogu talagalay qofka haysta carruur da’doodu u dhaxayso 0-6

# Horumari luqadda ilmahaaga!

Miyaad ogayd in ilmahaagu billaabay horumarinka luqaddiisa isla wakhtigii uu dhashay? Taas macnaheedu waxay tahay adiga oo ah qofkii mas'uulka ahaa aad ayaad muhiim ugu tahay horumarka luqadda ilmahaaga. Ma tahay qof xiisaynaya, furfuran oo dhiirigelinaya ilmihiisa inuu isticmaalo dhammaan luqadihiisa door weyn ayey arrintaasi ka ciyaaraysaa.

Qoraalkan waxaad ka akhrisan kartaa

- sida ay carruurtu u horumariyaan luqadda
- doorkaaga mas'uuliyadeed
- ahmiyadda uu dugsiga xannaanadu u leeyahay horumarka luqadda.

Wasaaradda waxbarashadu waxay rabtaa in qoraalkan aad ka hesho dhiirigelin, aqoon kororsi iyo qalab aad kor ugu qaaddo horumarka luqadda ilmahaaga.

# Horumararka luqadda carruurtu waxay billaabataa wakhti hore

Horumarka luqaddu waxay billaabataa waqti dheer ka hor inta aanu ilmuhu ku hadlin ereyadiisa ugu horreeya. Carruurta dhegaha la' iyo carruurta maqalkoodu xun yahay, horumarka luqaddu waxay u billaabataa inta aanu ilmuhu sawirin calaamadaha ugu horreeya ka hor. Cilmi baaristu waxay tilmaamaysaa sida ay muhiim u yihiin dadaallada lagu bixiyo  horumarka luqadda ee carruurta da'da yar marka luqadda la aasaasayo.

Luqad qani ah ayaa aad muhiim ugu ah waxbarashada ilmahaaga - dugsiga xannaanada, iskuulka iyo inta noloshiisa ka hadhay! Horumarka luqadda waxaa si weyn u saameeya xiisegelinta luqadda ee ilmuhu helo iyo mowqifka ku wajahan luqadda uu ilmuhu la kulmo. Sidaa darteed waa muhiim in ilmahaagu arko, maqlo oo uu la kulmo luqadda nolol maalmeedkiisa.

Luuqadda oo caawinaysa awgeed ilmuhu wuxuu bartaa inuu fahmo, si uu u turjumto waxa ku xeeran oo uu kala sooco xusuustiisa. Inuu awood ugu yeesho si uu isu-muujiyo sidoo kale waa muhiim inuu si firfircoon uga qayb qaadan karo bulshada sidaas darteedna waa xuquuq dimuqraadi ah.

### Carruurtu waxay luqadda ku bartaan dadka waaweyn oo tusaale ahaan

- indhaha ka eegaya oo qiyaasaya waxa uu ilmuhu rabo inuu sheego
- dhegaysata ilmaha
- ku celceliya erayada uu ilmuhu yiraahdo
- ku balaadhinaya wada hadalka erayo cusub
- adeegsanaya dhaqdhaqaaqyo, shucuurta wejiga iyo hadalka jirka si loo xoojiyo waxa la sheegayo
- qaafiyad, ereyo safan iyo heeso
- wakhti hore buugaagta baraya
- kala hadlaya sawirada ilmaha
- wax u akhriyaya oo u sheega ilmaha
- afkaarta is-dhaafsanaya ee aan wax u sheegayn oo keliya ilmaha
- abuuraya fursado ciyaaro ah oo uu xiriir kula yeesho carruurta kale.

# Maadaama aad mas’uul tahay muhiimmad weyn ayaad u leedahay

Waxaad adigu aad muhiim ugu tahay horumarka luqadda ilmahaaga. La hadal, u akhri oo la ciyaar ilmahaaga! Markaa ilmuhu wakhti hore ayuu ogaanayaa inay isgaarsiintu macno leedahay. Isticmaal luqadda ama luqadaha aad u aragto inay adiga kuugu sahlan yihiin inaad wax ku cabbiri kartid. Carruurta dhegaha la’ waxay sidoo kale isticmaalaan luqadda ama luqadaha uu ilmuhu ku qaadan isagoon isku taxallujin, taas oo ah waxa uu ilmuhu heli karo.

## Kor ugu akhri ilmahaaga

Fadlan wax u akhri ilmahaaga wakhti kooban maalin kasta. Akhriska waxaa la waafajin karaa iyadoo lagu salaynayo da’da iyo korriinka ilmaha. Marka ilmahaagu yar yahay, waxa ku haboon buugaag fudud iyo wakhti yar oo kooban Marka ilmuhu wax yar sii weynaado, wakhtiga akhriska ayaad u sii dheerayn  kartaa oo waxaad dooran kartaa buugaag sawiro iyo qoraal badan leh. Ka dib waxaad u wareegi kartaa akhrinta buugaagta cutubyada ka kooban. Fadlan kala hadal ilmahaaga waxaad akhriday oo si wadajir ah uga fikira. Maktabadda waxaad ka amaahan kartaa buugaagta carruurta oo ku qoran luqadda iswiidhishka iyo luqaddo kale oo badan – dhammaantoodna waa bilaash. Maktabado badan ayaa sidoo kale leh wakhtiyo sheekooyin iyo waxqabadyo kale oo loogu talagalay carruurta, mararka qaarkood dhowr luqadood oo kala duwan.



## Ka qayb qaado dugsiga xannaanada ee furan



Meelo badan oo waddanka ka mid ah waxaa ka jira dugsiyo xannaano oo furan. Waa goob kulan oo lacag la'aan ah oo loogu talagalay carruurta iyo dadka mas'uuliyiintooda ah. Dugsiga xannaanada ee furan waxa loogu talagalay carruurta ugu yaryar ee aan weli billaabin dugsiga xannaanada. Halkaa oo ay carruurtu ka qayb qaadan karaan waxqabadyo kooxeed iyaga iyo carruurta kale iyo dadka waaweyn, taas oo horumar u noqonaysa wada ciyaartooda iyo luqaddooda.

## Warbixinta dugsiga xannaanada oo khuseysa luqadda ilmahaaga

Haddii aad ku hadasho dhawr luqadood qoyska dhexdiisa, way wanaagsan tahay inaad u sheegtaan shaqaalaha dugsiga xannaanada ee ilmahaaga. Si wada jir ah ayaad uga fikiri kartaan waxa lagu taageeri karo luqadda ilmaha. Waxaad wax ku caawin artaa aqoontaada ku aadan waxa ilmuhu xiiseeyo iyo sida ilmuhu xiriirka u sameeyo. Waxay arrintaasi dugsiga xannaanada ka caawinaysaa inay qorsheeyaan oo qaabeeyaan waxbarashada.

## Ku dhiirigeli ilmahaaga inuu horumariyo luuqadihiisa dhammaantood

Fadlan abuur fursado uu ilmuhu kula kulmi karo dadka yaqaanna ee ku hadla luqadda qoyska. Waxay qiimo u leedahay horumarka luqadda ilmahaaga ee luqadda Iswiidhishka si uu ula kulmo dadka ku hadla luqadda iswidhishka ee ku sugan xaalado kala duwan. Fadlan sidaa darteed booqo goobaha carruurtu ku ciyaarto iyo maktabadaha ama ka qayb qaado aktiifiteetyada ciyaaraha halkaas oo uu ilmuhu kula xiriiri karo carruurta kale iyo dadka waaweyn ee ku hadla luqadda ilmahaaga.



# Dugsiga xannaanadu muhiimad weyn ayuu leeyahay

Daraasado dhowr ah ayaa muujinaya in carruurta dhigatay dugsi xannaano ay leeyihiin xirfado luqadeed oo ka wanaagsan carruurta kale. Waxbarashada dugsiga xannaanadu waxay ilmahaaga siinayaan fursad uu ku horumariyo luqad qani ah iyo kayd erayo ah iyo sidoo kale awood uu kula xiriiro/kula hadlo dadka kale xaalado kala duwan.

### Carruurtu dhammaantood waa inay helaan jawi luqadeed oo xiisogelinaya

Sluuqadda, waxbarashada iyo horumarka aqoonsiga ayaa isku xidhan. Taas macnaheedu waxay tahay in carruurtu ay u baahan yihiin inay fikiraan, waxbartaan oo ay isgaarsiin la sameeyaan carruurta kale. Mid kasta oo dugsiyada xannaanada ka mid ah waa in la waafajiyaa, habka shaqada, deegaanka iyo agabka baahida carruurta. Dhammaan carruurta dhigata dugsiga xannaanada waa inay helaan jawi luqadeed oo xiisogelinaysa halkaas oo shaqaalaha dugsiga xannaanadu ay tusaale u noqonayaa isgaarsiinta. Waxqabadyada dugsiga xannaanadu wuxuu ka dhacaa gudaha iyo dibaddaba, tusaale ahaan ciyaarta, xilliga cuntada iyo dhar xirashada.

## Carruurtu dhammaantood waa inay luqadooda iswiidhishka horumariyaan

Dugsiga xannaanada carruurtu waa tallaabada ugu horreysa ee nidaamka waxbarashada iswiidhishka, waana kan dhidibada u taagaysa waxbarashada ka sii socon doonta iskuulka iyo nolosha inteeda kale. Dugsiga xannaanadu waa inuu xoogga saaro xiisogelinta horumarinta luqadda iswiidhiska ee carruurta. Taas waxaa lagu samayn karaa iyadoo laga faa'iidaysanayo waxa ay xiisaynayaa iyo waxay jecel yihiin. Tani waxay khusaysaa carruurta afkooda hooyo uu yahay iswidhishka, carruurta afkooda hooyo aanu ahyn iswidhishka iyo carruurta xaqa u leh luqadaha laga tirada badan yahay ama luqadda iswiidhiska ee dhegoolayaasha ee faraha laga hadlo. Luqadda iswidishka ayaa shuruud u ah carruurtu inay bartaan akhrinta, qorista iyo wax ku xisaabinta luqadda iswiidhishka. Sidaa darteed dugsiga xannaanadu wuxuu door muhiim ah ka ciyaaraa si uu u ahaado goob kulan iyo u diyaarinta carruurta si ay u noqdaan muwaadiniin firfircoon bulshada dhexdeeda.

**Miyaad ogayd** in carruurtra la siiyo fursad ay ku horumariyaan afkooda hooyo waxay sidoo kale leeyihiin fursado fiican oo ay ku bartaan luqadda iswiidhishka ah?

**Miyaad ogayd** in aanay dhowr luuqadood ahayn inay tartamaan, laakiinse ay tahay inay is-taageeri karaan?

**Miyaad ogayd** in ay muhiim tahay in aad u dulqaadato oo aad luuqadaada ama luqadahaaga kula hadasho ilmaha haddii aad rabto in ilmahaagu noqdo mid ku hadla luqado badan?

## Carruurta waa in loo oggolaadaa inay horumariyaan luqadahooda dhammaantood

I dugsiga xannaanada waxaa ku kulmaya dad dhaqamo kala duwan leh, waana wax caadi ah in carruurtu ay ku kala hadlaan luqado kala duwan. Maadaama ay bulshadu noqotay mid caalami ah oo dhaqamada kala duwani ay ku sii bataan, luqadaha badan ayaa ah awood xirfadeed iyo agab waxbarasho. Nolosha shaqada ee mustaqbalka, waa faa'iido inaad barato luqado badan oo aad fahamto dhaqamo kala duwan. Markay carruurtu isticmaalaan luqadaha dhammaantood, markaa luqaduhu hodan ayey iska dhigi karaan. Sidan ayey carruurtu ku helayaan fursado badan oo ay ku horumariyaan fikirkooda iyo waxbarashadooda.

Carruurta ku hadasha luqadaha badan waxay inta badan adeegsadaan ereyo ka kala yimid luqado kala duwan iyagoo ku sugan xaalado kala duwan. Taas macnaheedu waxay tahay in ay isticmaalaan dhammaan luqadahooda si loo fahmo. Waa mid dabiici ah oo shaqaynaysa. Waa wax caadi ah in carruurta ku hadasha luqadaha badan ay si sahlan ugala sheekeysan karaan maadooyinka qaarkood hal luqad marka loo eego luqadda kale. Sidoo kale waa wax caadi ah in carruurta ku hadasha luqadaha badan inay doorbidaan inay isticmaalaan hal ama laba luqadood xilliyada qaarkood.

Intee in leeg ayuu ilmahaagu baranayaa luqadda iswiidhishka waxay ku xidhan tahay inta uu ilmuhu fursad u haysto isticmaalo luqadda. Sidaa darteed, waa muhiim in ilmahaagu uu wax badan joogo dugsiga xannaanada. Carruurta si joogto ah u maqasha uguna hadasha luqadda Iswiidhishka waxay baran karaan luqadda, iyadoon loo eegin luqadda afkooda hooyo.




Haddii ilmahaagu dhegool yahay, uu maqlkiisu xun yahay ama sababo kale awgeed uu u baahan yahay luqadda dhegoolayaasha, waa in ilmaha la siiyaa si uu u horumariyo luqadda dhegoolaha ee faraha lagaga hadlo. Luqadda iswidishka  iyo luqadda dhegoolayaasha ee faraha lagaga hadlo ayaa loo baahan yahay si loo awoodo xiriirka isgaarsiinta, si loo fahmo oo si siman looga qayb qaato. Si loo helo bulsho si wadajir ah iyo mid shakhsi ahaaneedba u shaqaynaysa.

## Carruurtu dhammaantood waa inay maqlaan wax kor loogu akhriyo oo ay ka qayb qaataan wada hadalada

Dugsiga xannaanada waxa la isticmaalo waxa ka mid ah kor u akhrinta, sheekooyinka afka looga sheekeeyo iyo wada hadalada si loo horumariyo luqadda carruurta. Carruurta waa in la siiyaa fursad ay kaga sheekeeyaan wixii loo sheegay oo ay la sheekaystaan carruurta kale iyo dadka waaweyn labadaba. Dugsiga xannaanadu wuxuu bixiyaa suugaanta luqadda iswiidhishka ah iyo dhawr luqadood oo kale. Waa muhiim in deegaanada iyo dhaqamada kala duwan ee carruurtu ay ka muuqdaan dhaqdhaqaaqyada kala duwan ee dugsiga xannaanada, buugaagta iyo sawirada si carruurtu dhammaantood u aqoonsadaan markale.

## Shaqaalaha dugsiga xannaanada iyo dadka mas'uuliyiinta ahi waa inay wada shaqeeyaan

Dugsiga xannanadu waa inuu kula yeeshaa wadahadalo joogto ah oo ku saabsan farxad ku jooga, horumarka iyo waxbarashada ilmahaaga hadaad tahay qofka mas'uulka ah. Waxa kale oo ka mid ah wada hadalka ku saabsan horumarka luqadda ilmahaaga. Wada shaqayn fiican oo dhexmarta shaqaalaha dugsiga xannaanada iyo mas'uuliyiinta carruurta oo ku salaysan hab dhaqan ka dhexeeya ayaa kor u qaada horumarka luqadda ilmaha.

## Afka hooyo ee dugsiga xannaanada

Carruurta ku hadasha afka hooyo ee aan ahayn iswidhishka waa in la siiyaa fursad ay ku horumariyaan luqadahaas. Taageero ay ka helaan dugsiga xannanada iyo guriga labadaba, waxay carruurta ku hadasha luqadaha badan kobcin karaan afkooda hooyo ama afaf-kooda hooyo iyo kan iswidhishka ah labadaba. Dugsiga xannaanadu waa inuu sidoo kale hubiyaa in dhaqamada kala duwan ay ka muuqdaan waxbarashada.

## Luuqadaha qaranka ee laga tirada badan yahay ee dugsiga xannaanada

Carruurta ka tirsan dadka laga tirada badan yahay ee qaranku waa inay  helaan taageero ku saabsan horumarka luqadooda oo ah luqadda dadka laga tiro badan yahay. Waa inay sidoo kale helaan taageero si ay u horumariyaan dhaqanka aqoonsigooda. Waxaa jira degmooyin ka tirsan maamulka finnishka, meänkieli iyo samiska. Haddii ilmuhu ku nool yahay mid ka mid ah degmooyinkaas, wuxuu ilmuhu xaq u leeyahay inuu gebi ahaan ama waa muhiim inuu ku dhigto dugsiga xannaanada luqadda dadka laga tirada badan yahay. Dugsiga xannaanadu waa inuu sidoo kale gacan ka geystaa horumarka luqadaha qaranka ee laga tirada badan yahay ee jiddicsh iyo romani chib.

Markay noqoto dugsiga xannaanada ee furan, haddii ay jirto baahi, waa inay degmadu ku dadaasho inay ku bixiso dhammaan ama qayb muhiim ah oo ka mid ah hawlaha la qabanayo luqaddaha finnishka, meänkieli iyo samiska.

## Luqadda dhegoolayaasha ee faraha lagaga hadlo ee dugsiga xannaanada

Carruurta dhegoolayaasha ah, kuwa uu maqalkoodu xun yahay ama ay jiraan sababo kale waxay u baahan yihiin luqadda dhegoolayaasha ee faraha lagaga hadlo, tusaale ahaan haddii qof qaraabo dhow uu ah ilmaha uu dhegool yahay waxay xaq u leeyihiin inay helaan taageero ku saabsan horumarka luqaddooda, ee luqadda dhegoolayaasha ee faraha lagaga hadalo iyo inay helaan jawi waxbarasho oo wanaagsan oo ku salaysan shuruudahooda iyo baahidooda.

Miyaad ogayd inuu ilmahaagu billaabay horumarka luqadiisa isla wakhtigii uu dhashay? Taas macnaheedu waxay tahay adiga oo ah qofkii mas'uulka ahaa muhiim ayaad u tahay horumarka luqadda ilmahaaga. Sidaa darteed, waxaa muhiim ah in aad xiisaynayso, aad tahay qof furan oo aad ku dhiirigeliso inuu ilmahaagu isticmaalo oo uu horumariyo luqadihiisa dhammaantood.

Daraasado dhowr ah ayaa muujinaya in carruurta dhigata dugsiga xannaanadu ay leeyihiin xirfado luqadeed oo ka wanaagsan carruurta kale.

Waxbarashada dugsiga xannanadu waa inay siisaa ilmahaaga shuruudo uu ku horumariyo luqad qani ah iyo kayd erayo ah iyo sidoo kale awood uu kula xiriiro dadka kale xaalado iyo ujeeddooyin kala duwan.

Horumarka luqaddu waa aasaaska waxbarashada nolosha oo dhan.

**Sii ilmahaaga bilow wanaagsan - xooji luqadda!**

Agabka waxaa soo saaray

Skolverket
Swedish National Agency for Education